

**Instructions to Apply for an Order for Protection**  
**(Minn. Stat. § 518B.01)**  
***Tilmaamaha Dalabka Ammarka Badbaadinta***  
***(Minn. Stat. § 518B.01)***

**What is an Order For Protection?**

An Order for Protection (OFP) is an order signed by a judge that may help protect you from domestic abuse. An OFP orders the abuser not to contact, harm or threaten to harm you, your children or other people the judge agrees to list on the order. You can also ask the judge to order the abuser to do certain things or stop doing certain things to help keep you safe.

**Maxuu Yahay Ammarka Badbaadinta?**

*Ammarka Badbaadinta (OFP) waa ammar uu saxiixo garsooraha ee laga yaabo in uu qofka ku kaalmeeyo ka badbaadinta ku xadgudubka guriga. OFP wuxuu ku ammaraa xadgudbaha in uusan la xariirin, waxyeelin ama ku hanjabin in uu waxyeelo ku gaarsiiyo adiga, caruurtaada ama dadka kale uu garsooraha raali ku noqdo in uu ku qoro ammarka. Waxaad kaloo weydiin kartaa garsooraha in uu ku amro ku xadgudbaha in uu sameeyo waxyaabaha qaar ama joojiyo in uu sameeyo waxyaabaha qaar si loo dhowro ammaankaada.*

**Who May Apply for an OFP?**

The person applying for the OFP is called the petitioner. The abuser is called the respondent. The petitioner may apply for an OFP if domestic abuse has occurred AND if the petitioner and respondent are family or household members. **Please see the legal definitions below to determine if domestic abuse exists in your situation and if the petitioner and respondent are family or household members.**

**Yaa Dalban Kara OFP?**

*Qofka dalbada OFP waxaa lagu magacaabaa codsade. Ku xadgudbaha waxaa lagu magacaabaa eedeysane. Codsadaha wuxuu dalban karaa OFP haddii ay jirto ku xadgudubka guriga IYO haddii codsadaha iyo eedeysanaha yahiiin xubno ka tirsan qoyska ama reerka. **Fadlan fiiri sharaxaadda sharciga hoose si aad u ogaatid haddii ku xadgudubka guriga ka jirto xaaladaada iyo haddii codsadaha iyo eedeysanaha yahiiin xubno ka tirsan qoyska ama reerka.***

In certain circumstances, a petitioner may also apply **on behalf of** another person. For example, a petitioner may apply on behalf of a minor child if there has been domestic abuse of the child by the respondent and the petitioner is:

*Xaaladaha qaar, codsadaha wuxuu kaloo **u dalbi karaa** qof kale. Tusaale ahaan, waxaa dhici karto in codsadaha u dalbado cunug yar haddii eedeysanaha uu ku xad gudbo cunugga iyo codsadahana yahay:*

- a family or household member of the child; or  
*xubin ka tirsan qoyska ama reerka cunugga; ama*
- the child's parent or guardian; or  
*waalidka cunugga ama ilaaliyaha; ama*
- a reputable adult age 25 or older, if the judge finds that it is in the best interest of the minor.  
*qof weyn magac leh oo jira 25 sanno ama ka badan, haddii garsooraha u garto in ay tahay maslaxadda ugu fiican qofka yar.*

A person aged 16 or 17 may apply for an OFP on his or her own if there has been domestic abuse and the respondent is someone the petitioner:

*Qofka jira 16 sanno ama 17 sanno wuxuu iskiisa ama iskeeda u dalban kartaa OFP haddii uu jiro ku xad gudubka guriga iyo eedeysanahana uu yahay qof uu codsadaha:*

- is married to;  
*guursaday;*
- was married to; or  
*horay u guursaday; ama*
- has a child with, if the judge finds that the petitioner has sufficient maturity and judgment and that it is in the best interest of the minor.  
*la leeyahay cunug, haddii garsooraha u arko in codsadaha yahay qof bissil oo garasho leh iyo in ay tahay maslaxadda ugu fiican qofka yar.*

### **Where May the Petitioner Apply for an OFP?**

#### **Xaggee Looga Baahan Yahay in Codsadaha ka Dalbado OFP?**

The petitioner may apply for an OFP in the court:

*Codsadaha wuxuu OFP ka dalban karaa maxkamadda:*

- in the county where the petitioner lives;  
*dagmada meesha codsadaha ku nool yahay;*
- in the county where the respondent lives;  
*dagmada meesha eedeysanaha ku nool yahay;*
- in the county where the domestic abuse occurred;  
*dagmada meesha ku xadgudubka guriga ka dhacay;*
- in any county where there is a pending or completed family court case involving the petitioner and the respondent or their minor children, such as a divorce or a child custody case; or  
*dagmo kasta uu weli kiis ka furan yahay maxkamadda ama lagu soo affaray kiis la xariira maxkamadda qoyska kuna lug leh codsadaha iyo eedeysanaha ama caruurtooda yaryar, sida kiisaska furiinka ama haynta cunugga; ama*
- in the court with jurisdiction over divorce actions.  
*maxkamadda awoodda ku leh falalka furiinka.*

### **How Much Does It Cost to Apply for or Serve the OFP?**

There is no cost to apply for an OFP. If the judge grants the OFP, the OFP must be personally delivered to, or served, on the respondent. There is no cost to the petitioner to serve the OFP on the respondent.

#### **Meeqa Ayaa ku Baxda Dalabka ama Gaarsiinta OFP?**

*Ma jiro kharash ku baxa dalabka OFP. Haddii garsooraha ku siiyo OFP, waa in OFP\_ga loo geeyo ama la gaarsiiyo eedeysanaha. Ma jiro kharash uga baxa codsadaha si eedeysanaha loo gaarsiiyo OFP.*

### **Definitions:**

#### **Sharaxaadda:**

1. **Domestic Abuse** is defined as any of the following conduct between family or household members, regardless of whether this conduct has ever been reported to the police:

*Ku Xadgudubka Guriga waxaa lagu sifeeyaa mid kasta oo ka mid ah dabeecadaha soo socda ee dhex mara xubnaha qoyska ama reerka, iyadoo aan la fiirin haddii warbixinta falka noocaan la gaarsiiyay boliiska:*

- a. Actual physical harm, bodily injury, assault (such as hitting, kicking, slapping, pushing, stabbing), or fear of imminent physical harm, bodily injury or assault (such as verbal threats, threatening gestures); or  
*Waxyeelada dhabta ah ee loo geysto jirka, dhaawaca jirka, weerarka (sida ku dhufashada, haraatida, dharbaaxyada, riixidda, dooxidda), ama cabsi gelinta in loo geysan doono waxyeelada jirka, dhaawaca jirka ama weerar (sida hanjabaadda afka, hanjabaadda dhaqaajinta jirka); ama*
- b. Terroristic threats (such as a threat to kill, break bones, or threatening someone with a knife or a gun); or  
*Hanjabaadda argagixisada (sida hanjabaadda in la geysan doono dil, la jebin doono lafaha, ama qofka loogu hanjabo middi ama qori); ama*
- c. Criminal sexual conduct with an adult (such as forced sex or forced contact with intimate body parts, even if the parties are married) or any form of sexual contact with a child; or  
*Falka dambiga kacsiga ee lala sameeyo qofka weyn (sida kacsiga qasabka ah ama taabashada qasabka ah ee loo adeegsado qeybaha asturan jirka, xattaa haddii dhinacyada isqabaan) ama nooc kasta taabashada kacsiga ee lala sameeyo cunug; ama*
- d. Interference with an emergency call (intentionally interrupting or preventing someone from placing an emergency call.)  
*Faragelinta telefoonka degdegga (si ula kac ah loo farageliyo ama qof looga hor istaago in uu diro telefoon degdeg ah.)*

2. **Family or household members** are defined as:

*Xubnaha qoyska ama reerka waxaa lagu sifeeyaa in ay yaahiin:*

- a. Married persons  
*Dadka isqaba*
- b. Persons who were married but are now divorced  
*Dadka horay isu guursaday balse iminka is furay;*
- c. Parents, children  
*Waalidiinta, caruurta*
- d. Persons related by blood or adoption (such as brothers, sisters, uncles, aunts, or grandparents)  
*Qaraabada laxmi ama la korsaday (sida wiilasha walaalaha, gabdhaha walaalaha, adeerada iyo abtiyada, eedooyinka iyo aayooyinka, ama awooweyaasha ama ayeeyooyinka)*
- e. Persons who live together now or who lived together in the past  
*Dadka imink wada nool ama horay u wada noolaay*
- f. Persons who have a child together, even if they have not been married or lived together  
*Dadka uu ka dhexeeyo cunug, xattaa haddii aysan is guursanin ama wada nooleyn*
- g. Persons who have an unborn child together  
*Dadka haysta cunug aan weli dhalanin*
- h. Persons involved in or who were involved in a significant romantic or sexual relationship (regardless of sexual orientation)  
*Dadka ay ka dhexeeyso ama ka dhexeysay xariirka jeceelka ama kacsiga (iyadoo aan la fiirin kacsiga qofka)*

**If your application DOES NOT involve "domestic abuse" AND "family or household members" as defined above, you cannot apply for an OFP. However, you may still be able to apply for a Harassment Restraining Order (HRO). Please ask at the court administrator's office for HRO forms and instructions to see if you qualify.**

***Haddii arjigaada UUSAN ku lug lahayn "ku xadgudubka guriga" IYO "xubnaha qoyska ama reerka" sida ku sifeysan kor, ma dalban karti OFP. Hase ahatee, waxaad weli awood u leedahay in aad dalbatid Ammarka Ka Celinta Kadeedka (Harassment Restraining Order) (HRO). Fadlan weydii xafiiska maamulaha maxkamadda si lagu siiyo foomamka HRO iyo tilmaamaha si aad u ogaatid haddii aad xaq u leedahay.***

**If your complaint DOES involve "domestic abuse" AND "family or household members," you may complete the Petitioner's Affidavit and Petition for Order for Protection (Form OFP102) according to the following instructions.**

***Haddii cabashadaada KU lug leedahay "ku xadgudubka guriga" IYO "xubnaha qoyska ama reerka," waxaad buuxin kartaa Warqadda Dhaarta Codsadaha (Petitioner's Affidavit) iyo Codsiga Ammarka Badbaadinta (Petition for Order for Protection) (Foomka OFP102) sida waafaqsan tilmaamaha soo socda.***

**Instructions for Completing**  
**“Petitioner’s Affidavit and Petition for Order for Protection”**  
**Tilmaamaha Buuxinta**  
**"Warqadda Dhaarta Codsadaha iyo Codsiga Ammarka Badbaadinta"**

Helpful materials may be found at your public county law library. For a directory, see <http://mn.gov/law-library/research-links/county-law-libraries.jsp> . For more information, contact your court administrator or call the Minnesota State Law Library at 651-296-2775.  
*Waxyaabaha waxtarka leh waxaa laga heli karaa maktabka sharciga dadweynaha ee dagmadaada. Si aad u heshid liiska, fiiri <http://mn.gov/law-library/research-links/county-law-libraries.jsp> . Si aad u heshid macluumaad dheeraad ah, la xariir maamulaha maxkamadda ama wac Maktabka Sharciga Gobolka Minnesota, telefoonka 651-296-2775.*

Courts must provide simplified forms and clerical assistance to help you with the writing and filing of this form. Court staff cannot provide you with legal advice.

*Maxkamadaha waa in ay bixiyaan foomam sahlan iyo kaalmada karaaniga si laguugu kaalmeeyo qoraalka iyo buuxinta foomkaan. Shaqaalaha maxkamadda kuma siin karaan waanada sharciga.*

Please consider talking with an advocate to learn more about applying for an OFP and to help you stay safe. An advocate may also be able to connect you with an attorney experienced with helping people in your situation. To be connected with an advocate, you may call the Day One® MN Domestic Violence Crisis line at 1.866.223.1111.

*Fadlan ku fakar in aad la hadashid u-doode si aad u ogaatid sida loo dalbado OFP iyo si loo dhowro ammaankaada. Waxaa kaloo dhici karta in u-doodaha kugu xero qareen waayo arag u leh kaalmada la siiyo dadka ku jira xaaladaada. Si laguula xariiriyo u doodaha, waxaad wici kartaa Shiddada Dagaalka Guriga Day One® MN (Day One® MN Domestic Violence Crisis), telefoonka 1.866.223.1111.*

In the box marked "County," write the name of the county in which you are applying for the OFP.

*Gudaha sanduuqa ku calaameysan "Dagmo," waxaad ku qortaa magaca dagmada aad ka dalbaneysid OFP.*

Court administration staff will fill in the "Judicial District" and "Court File Number" box.

*Shaqaalaha maamulka maxkamadda waxay buuxin doonaan "Maxkamadda Gobolka" iyo sanduuqa "Nambarka Faylka Maxkamadda."*

On the line above the word "Petitioner," write your own name. If you are seeking protection for yourself, check the box that states, "and for her/himself." If you are applying on behalf of another person or persons, write those persons' names on the lines below the words "On behalf of." On the line above the word "Respondent," write the name of the person you want to be protected from.

*Sadarka ka koreeyo erayga "Codsade," ku qor magacaada. Haddii aad badbaadinta u rabtid naftaada, calaamee sanduuqa ku qoran, "iyo naftiisa/nafteeda." Haddii aad u dalbeysid qof kale ama dad kale, waxaad magacyada dadkaan ku qortaa xariiqmanka hoose, meesha ka hooseyso erayda "mattalaadda." Sadarka ka koreeyo erayga "Eedeysane," ku qor magaca qofka aad rabtid in lagaa badbaadiyo.*

**THE NUMBERS OF THESE INSTRUCTIONS ARE THE SAME AS THE**  
**NUMBERS ON THE AFFIDAVIT AND PETITION**  
**(FORM OFP102)**

**NAMBARADA TILMAAMAHAAN WAA ISLA MID SIDA NAMBARADA KU**  
**YAAL WARQADDA DHAARTA IYO CODSIGA (FOOMKA OFP102)**

**Petitioner, Protected Person and Respondent Information**  
***Macluumaadka Codsadaha, Qofka la Badbaadiyo iyo Eedeysanaha.***

1. Check the box next to all of the people that need protection. You may check more than one box.  
*Calaamee sanduuqa ku xiga dhamaan dadka u baahan badbaadinta. Waxaad calaameyn kartaa in ka badan hal sanduuq.*
2. Write your name, complete address, race, gender and date of birth. **If you do not want the respondent to know your address, or if you do not want your address to be part of the public file, DO NOT WRITE YOUR ADDRESS HERE; instead, check the box indicating you want your address kept confidential and provide your address separately to court staff on the Confidential Address/Phone Request form OFP107.**  
*Qor magacaada, buuxi cinwaanka, isirka, lab/dhedig, iyo taariikhda dhalashada. Haddii aadan rabin in eedeysanaha ogaado cinwaankaada, ama haddii aadan rabin in cinwaankaada uu qeyb ka noqdo faylka dadweynaha, CINWAANKAADA HA KU QORIN HALKAAN; balse calaamee sanduuqa muujiya in aad rabtid in la asturo cinwaankaada kaddibna waxaad cinwaankaada si gaar ah u siisaa shaqaalaha maxkamadda foomka OFP107 Codsiga Cinwaanka/Telefoonka Qarsoodiga (Confidential Address/Telephone Request).*
3. If you want to be notified by email when the respondent is served with the OFP, include your email address here.  
*Haddii aad dooneysid in laguugu soo ogeysiyo email marka eedeysanaha la gaarsiiyo OFP, halkaan ku soo qor emailkaada.*

Please note that this is the only email you will receive from the court about the OFP unless you have signed up to receive other court notices via email. It will only be possible for the court to notify you by email when service information is received by the court from law enforcement. A technical or other error could occur preventing the successful delivery of the email. You have other options to learn of the service of the OFP on the respondent, including contacting law enforcement directly. The email address you provide must be valid in order to receive this notification of service. This email address will be seen by the respondent.

*Fadlan xasuuso in emailkaan yahay emailka keliya aad ka heli doontid maxkamadda ee ku saabsan OFP haddii aadan isku qorin in maxkamadda email kuugu soo dirto ogeysiisyada kale. Waxaa suurto gal u noqon doontaa maxkamadda in ay kugu ogeysiiso email marka ay macluumaadka gaarsiinta ka hesho hirgelinta sharciga. Waxaa lala kulmi karaa qaladka farsamada ama qalad kale taasoo hor istaagta in lagu guuleysto gaarsiinta emailka. Waxaad haysataa fursado kale oo aad ku ogaatid in eedeysanaha la gaarsiiya OFP, adiga oo si toos ah ula xariira hirgelinta sharciga. Emailka aad bixisid waa in uu ahaado mid sax ah si aad u heshid ogeysiiskaan gaarsiinta. Eedeysanaha wuu arki doonaa emailkaan.*

4. Write the name, complete address, race, gender and date of birth of the respondent. If you do not know the respondent's exact date of birth, give an approximate age or approximate date of birth. If the respondent is a minor, write the name and address of the respondent's parent or legal guardian.  
*Qor magaca, cinwaanka buuxa, isirka, lab/dhedig iyo taariikhda dhallashada eedeysanaha. Haddii aadan ogeyn taariikhda uu dhashay eedeysanaha, qiyaas da'da ama qiyaas taariikhda uu dhashay. Haddii eedeysanaha yahay qof yar, qor magaca iyo cinwaanka waalidka eedeysanaha ama ilaalayaha sharciga.*
5. List all of the persons that need protection other than you, if any. Then, complete the chart with the information required for each person you have listed.  
*Qor liiska dhamaan dadka u baahan badbaadinta marka lagaa reebo adiga, haddii ay jiraan. Kaddibna, waxaad jaantuska ku qortaa macluumaadka looga baahan yahay qof kasta oo aad ku qortay liiska.*
6. List all minor children that you and respondent have together, biological or adopted, who you did not already list at #5, if any.  
*Qor liiska dhamaan caruurta yaryar ee idinka dhaxeyso adiga iyo Eedeysanaha, laxmi ahaan ama kuwa aad korsateen, oo aadan weli ku qorin liiska #5, haddii ay jiraan.*
7. List all minor children living with you, who you did not already list at #5 or #6, if any.

*Qor liiska dhamaan caruurta yaryar ee kula nool adiga, oo aadan horay ugu qorin #5 ama #6, haddii ay jiraan.*

8. Check all of the boxes that describe your relationship to the respondent or the relationship between other persons needing protection and the respondent. To qualify for an OFP, you only need to meet one of these requirements. If you check the last box, "Significant romantic or sexual relationship," you must also fill in the blanks next to it.

*Calaamee dhamaan sanduuqyada sharaxda xariirka aad la leedahay eedeysanaha ama xariirka kale ee ka dhexeeyo dadka kale ee u baahan badbaadinta iyo eedeysanaha. Si aad u heshid OFP, waxaad u baahan tahay in aad la kullantid mid ka mid ah sharuudahaan. Haddii aad calaameysid sanduuqa ugu dambeeyo, "Xariirka jeceelka ama kacsiga," sidoo kale waa in aad buuxisid meelaha banaan ee ku xiga.*

### **Current or Prior OFP and Case Information** ***OFP\_ga iminka jira ama Hore iyo Macluumaadka Kiiska***

9. This section needs to be completed if you or other persons needing protection have an OFP **in effect now** with the respondent. Answer all of the questions here, if known.

*Waxaa loo baahan yahay in la dhamaystiro qeybtaan haddii adiga ama dadka kale ee u baahan badbaadinta aad **iminka OFP** ka haysatiin eedeysanaha. Halkaan uga jawaab dhamaan su'aalaha, haddii aad ogsoon tahay.*

10. This section needs to be completed if you or other persons needing protection have had an OFP **in effect in the past**. Write the court file number and the county and state where the past OFP was filed, if known.

*Qeybtaan waxay u baahan tahay in la dhamaystiro hadii adiga ama dadka kale ee u baahan badbaadinta aad **mar hore qaadateen OFP**. Qor nambarka faylka maxkamadda iyo dagmada iyo gobolka meesha OFP\_ga laga gudbiyay, haddii la ogsoon yahay.*

11. If you and the respondent have been jointly involved in other Court cases, check the box(es) of the types of cases and write the case type, number, state and county, year the cases were filed and the names of any children involved, if known.

*Haddii adiga iyo eedeysanaha aad si wadajir ah ugu lug yeelateen kiisas kale oo ka jira Maxkamadda, calaamee sanduuqa (sanduuqyada) noocyada kiisaska iyo qor nooca kiiska, nambarka, gobolka iyo dagmada, sannadka la soo gudbiyay kiisaska iyo magacyada caruurta ku lugta leh, haddii la ogsoon yahay.*

### **Abuse Information** ***Macluumaadka Ku Xadgudubka***

12. Write details about the most recent domestic abuse committed by the respondent. See the DEFINITIONS on Page 2 of these Instructions to be sure that what you describe are acts of domestic abuse. If possible, answer the questions provided. Be as specific as possible. Include the date or approximate date that the abuse occurred.

*Qor tafaasiisha ku saabsan xadgudubka guriga ugu dambeeyay uu geystay eedeysanaha. Fiiri SHARAXAADDA bogga 2aad Tilmaamahaan si loo hubsado in waxa aad sharaxday yahiin falalka ku xadgudubka guriga. Haddii ay suurtoqla tahay, ka jawaab su'aalaha lagu siiyay. Si wanaagsan u qor ilaa inta suurtoqla ah. Ku dar taariikhda ama ku dhawaad taariikhda ku xadgudubka lala kulmay.*

**If you need more room to write about the domestic abuse, you may use the "Attachment for Description of Additional Abuse" on page 22 of Form OFP102. You may also use an additional sheet of paper to describe the abuse. Please provide the court administrator with any additional sheets of paper describing the abuse.**

*Haddii aad u baahan tahay boos dheeraad ah oo aad ku qortid ku xadgudubka guriga, waxaad isticmaali kartaa "Lifaaqa Sharaxaadda Ku Xadgudubka Dheeraadka ah" bogga 22, Foomka OFP102. Waxaad kaloo isticmaali kartaa warqad dheeraad ah si aad u sharaxdid ku xadgudubka. Fadlan sii maamulaha maxkamadda warqado kasta oo dheeraad ah oo sharaxda ku xadgudubka.*

13. If there is a history of abuse between you or other persons needing protection and the respondent, briefly describe that abuse here.  
*Haddii ay jirto ku xad gudub la caadeystay oo dhex martay adiga ama dadka kale ee u baahan badbaadinta iyo eedeysanaha, si kooban halkaan ku sharax ku xadgudubkaas.*
14. Write why you believe that the domestic abuse will continue and why you or other persons needing protection are in immediate danger from the respondent.  
*Qor sababta aad ugu malleysay in ku xadgudubka guriga sii socon doono iyo sababta aad adiga iyo dadka kale ee u baahan badbaadinta aad halis degdeg ah uga jirtiin eedeysanaha.*
15. Check yes if the respondent works or attends school at the same place where you or other persons needing protection work or attend school. Check no if the respondent does not work or attend school at the same place as you or other persons needing protection.  
*Calaamee haa haddii eedeysanaha uu ka shaqeeyo ama tago dugsi ku yaal isla meesha aad adiga ama dadka kale ee u baahan badbaadinta ka shaqeysaan ama u tagtaan dugsigu. Ku calaamee maya haddii eedeysanaha uusan ka shaqeynin ama tagin dugsi ku yaal isla meesha aad tagtaan adiga ama dadka kale ee u baahan badbaadinta.*

### **Requests for Relief – No Hearing Required** **Codsiyada Garta - Looma Baahna Dhageysi**

You may ask the judge to order the respondent to do certain things or to stop doing certain things to help keep you safe. This is called “requesting relief.” Some types of relief can be ordered by the judge without requiring a hearing, but other types of relief require a hearing to be held.

*Waxaad garsooraha ka codsan kartaa in uu eedeysanaha ku amro in uu sameeyo waxyaabo qaar ama in uu joojiyo samaynta waxyaabo qaar, si loo dhowro ammaankaada. Tani waxaa lagu magacaabaa "codsiyada garta." Noocyada qaar garta, garsooraha wuxuu amri karaa dhageysi la'aan, hase ahaatee noocyada kale garta, waxay u baahan yahiin in la qabto dhageysi.*

16. This section details the type of relief that the judge can order WITHOUT requiring a hearing. Please read this section carefully before requesting relief. You may check more than one box  
*Qeybtaan waxay tafatirtaa garta uu garsooraha amri karo oo AAN u baahneyn dhageysi. Fadlaan si taxadir leh u akhri qeybtaan ka hor inta aadan codsanin garta. Waxaad calaameyn kartaa in ka badan hal sanduuq.*

It is possible that the judge will not grant the OFP. If this happens, you have the right to request a hearing so that you can explain to the judge why the OFP should be granted. The respondent has the right to be present at a hearing. Some petitioners do not want to do this because they do not want the respondent to find out they applied for an OFP. If this is the case, check the box in this section stating that you do not want a hearing.

*Waxaa suurtoagal ah in garsooraha uusan ku siinin OFP. Haddii tani dhacdo, waxaad xaq u leedahay in aad codsatid dhageysi si aad garsooraha ugu sharaxdid sababta loo baahan yahay in lagu siiyo OFP. Eedeysanaha wuxuu xaq u leeyahay in uu joogo dhageysiga. Codsadeyaasha qaar ma rabaan in ay sidaas sameyaan maxaa yeelay ma rabaan in eedeysanaha uu ogaado in ay dalbadeen OFP. Haddii sidaan tahay xaaladda, calaamee sanduuqa ku yaal qeybtaan kuna sheega in aadan rabin dhageysi.*

THE JUDGE MAY DECIDE THAT A HEARING IS REQUIRED EVEN THOUGH YOU DO NOT WANT A HEARING TO BE HELD. THE RESPONDENT ALSO HAS THE RIGHT TO REQUEST A HEARING SO IT IS POSSIBLE THERE WILL BE A HEARING SCHEDULED WITHIN THE NEXT FEW WEEKS EVEN IF YOU DO NOT REQUEST A HEARING OR INDICATE ABOVE THAT YOU DO NOT WANT A HEARING. IF THE RESPONDENT DOES REQUEST A HEARING, THE COURT WILL MAIL A NOTICE OF THE HEARING DATE TO YOU AT LEAST 5 DAYS BEFORE THE HEARING. THE COURT MUST HAVE YOUR CURRENT ADDRESS AT ALL TIMES TO ENSURE THAT YOU GET ALL REQUIRED NOTICES.

*WAXAA DHICI KARTO IN GARSOORAHA GO'AAN KU GAARO IN LOO BAAHAN YAHAY DHAGEYSI INKASTOO ADIGA AADAN RABIN IN LA QABTO DHAGEYSI. EEDEYSANAHA WUXUU KALOO XAQ U LEEYAHAY IN UU CODSADO DHAGEYSI MARKA WAXAA SUURTOGAL AH IN DHAGEYSIGA LA QABTO DHOWRKA TODOBAAD XIGA GUDAHOODA XATTAA HADDII AADAN*



*ADIGA CODSANIN DHAGEYSIGA AMA AAD KOR KU MUUJISAY IN AADAN RABIN DHAGEYSIGA. HADDII EEDEYSANAHA CODSADO DHAGEYSI, MAXKAMADDA WAXAY KUU SOO DIRI DOONTAA OGEYSIIS KU SAABSAN TAARIKHDA LA QABAN DOONO DHAGEYSIGA UGU YARAAAN 5 MAALIN KA HOR INTA AAN LA QABANIN DHAGEYSIGA. MAXKAMADDA WAA IN AY HAYSATO CINWAANKAADA IMINKA WAQTI KASTA SI LOO HUBSADO IN AAD HESHID DHAMAAN OGEYSIISYADA LOO BAAHAN YAHAY.*

- a. Check this box if you want the judge to grant an OFP right away. This is called an Ex Parte Order for Protection.

*Calaamee sanduuqaan haddii aad dooneysid in garsooraha uu isla markiiba bixiyo OFP. Tani waxaa lagu magacaabaa Ammarka Badbaadinta ee sida Gaarka ah loo Siiyo Dhinac Keliya (Ex Parte Order for Protection).*

- b. Check this box if you want the judge to order the respondent not to cause you or the protected persons physical harm or fear of physical harm.

*Calaamee sanduuqaan haddii aad dooneysid in garsooraha ammro eedeysanaha in uusan adiga iyo dadka la badbaadiyo u geysanin waxyeelada jirka ama cabsida waxyeelada jirka.*

- c. Check this box if you want the judge to order the respondent not to have any contact with you or the protected persons. If you need to have some limited contact with the respondent, specify under what circumstances contact with the respondent is okay. For example, some petitioners may feel that email contact with the respondent for the purposes of arranging parenting time only is okay.

*Calaamee sanduuqaan haddii aad dooneysid in garsooraha ammro eedeysanaha in uusan xariir kula yeelanin adiga ama dadka la badbaadiyo. Haddii aad u baahan tahay in aad xariir kooban la yeelatid eedeysanaha, sheeg daruufaha aad rabtid in aad kula yeelatid xariir toosan. Tusaale ahaan, codsadeyaasha qaar waxay la tahay in aysan dhibaato lahayn xariirka emailka ee lala sameeyo eedeysanaha marka ujeedada tahay qorsheynta waqtiga waalidnimada.*

- d. This section asks questions about whether or not the respondent may come to your home or other places where you or protected persons live or spend time. If there is an exception, please write what the exception is. For example, if it is okay for the respondent to park at the curb in front of your home to exchange the children, write that in the “except as follows” section.

*Qeybtaan waxay ku weydiisaa su'aalo ku saabsan haddii eedeysanaha imaan karo gurigaada ama goobo kale iyo haddii kale, meelaha aad adiga ama dadka la badbaadiyo ku nooshahiin ama waqtiga ku qaadataan. Haddii ay jirto wax ka reeban, fadlan qor waxa ay yahiin waxa ka reeban. Tusaale ahaan, haddii aysan dhibaato lahayn in eedeysanaha uu baabuurka dhigto dhinaca jidka, ka soo horjeedka gurigaada, si aad caruurta isu dhaafsataan, taasi waxaad ku qortaa gudaha qeybta "marka laga reebo sida soo socoto."*

**If you do not want the respondent to know your address, or if you do not want your address to be part of the public file, DO NOT WRITE YOUR ADDRESS HERE; instead, check the box indicating you want your address kept confidential and provide your address separately to court staff on the Confidential Address/Phone Request form OFP107.**

***Haddii aadan rabin in eedeysanaha ogaado cinwaankaada, ama haddii aadan rabin in cinwaankaada uu qeyb ka noqdo faylka dadweynaha, HALKAAN HA KU QORIN CINWAANKAADA; balse calaamee sanduuqa muujiya in aad rabtid in la asturo cinwaankaada kaddibna waxaad cinwaankaada si gaar ah u siisaa shaqaalaha maxkamadda foomka OFP107 Codsiga Cinwaanka/Telefoonka Qarsoodiga (Confidential Address/Phone Request).***

- e. Check this box if there is a work address that you want the respondent to be ordered not to enter, and list the employer’s name and address and any exceptions here.

*Calaamee sanduuqaan haddii uu jiro cinwaanka shaqada aad dooneysid in eedeysanaha lagu ammro in uusan qorin, iyo qor liiska magaca loo-shaqeeyaha iyo cinwaanka iyo waxyaabaha ka reeban halkaan.*

- f. Check this box if there is an additional address that you want the respondent to be ordered not to enter, and list that address and any exceptions here. For example, some petitioners write a daycare address here. *Calaamee sanduuqaan haddii uu jiro cinwaan dheeraad ah oo aad dooneysid in eedeysanaha lagu ammro in uusan qorin, iyo qor liiska cinwaankaas iyo waxyaabaha ka reeban halkaan. Tusaale ahaan, codsadeyaasha qaar waxay halkaan ku qoraan cinwaanka xanaanada maalinta.*
- g. Check this box if you want the judge to order that the respondent continue all insurance coverage which is currently available to you or protected persons without making any changes. *Calaamee sanduuqaan haddii aad dooneysid in garsooraha ammro eedeysanaha in uu sii wado bixinta kharashka dhamaan ceymiska aad iminka heli kartid ama ay heli karaan dadka la badbaadiyo iyo in uusan waxba ka baddalin.*
- h. Check this box if you want the judge to order that the possession and care of a pet or a companion animal be given to a particular person. Please provide the name, type and location of the pet or companion animal. *Calaamee sanduuqaan haddii aad dooneysid in garsooraha soo saaro ammar in lahaashada iyo daryeelka xoolaha guri joogga ama xoolaha wehelka lagu wareejiyo qof gaar ah. Fadlan bixi magaca, nooca iyo goobta ay ku sugan yahiin xoolaha guri joogga ama xoolaha wehelka.*
- i. Check this box if you want the judge to order the respondent not to abuse or injure the pet or companion animal you described in section (h). *Calaamee sanduuqaan haddii aad dooneysid in garsooraha ammro eedeysanaha in uusan ku xadgudbin ama dhaawicin xoolaha guri joogga ama xoolaha wehelka aad ku sifeysay qeybta (h).*
- j. Check this box if you want the judge to direct the local police or sheriff to provide you with assistance, and be specific about the type of assistance you need. For example, some petitioners request the judge to have the police or sheriff provide protection while the petitioner removes personal items from a home shared with the respondent. *Calaamee sanduuqaan haddii aad dooneysid in garsooraha uu booliiska xaafadda ama sheriifka faro in ay ku siiyaan kaalmo, iyo in aad si wanaagsan u sheegtid nooca kaalmada aad dooneysid. Tusaale ahaan, codsadeyaasha qaar waxay garsooraha ka codsadaan in boliiska ama sheriifka laga helo badbaadin inta codsadaha uu alaabta shakhsiga ka qaadanaayo guriga lala qeybsado eedeysanaha.*
- k. This section allows you to write in a form of relief that was not previously listed. It is up to the judge to decide whether the additional relief you write in this section requires a hearing or not. *Qeybtaan waxay kuu ogoshahay in aad ku qortid nooca garta aan horay loogu qorin liiska. Gaarsooraha ayaa mas'uul ka ah in uu go'aan ka gaaro in garta dheeraadka ah aad adiga ku qortid qeybtaan u baahan tahay dhageysi ama haddii kale.*

### **Requests for Relief – Hearing Required** ***Codsiyada Garta - Marka Loo Baahan Yahay Dhageysiga***

17. This section details the type of relief that the judge can order only after a hearing has been held. Please read this section carefully before requesting relief. You may check more than one box. *Qeybtaan waxay tafatirtaa nooca garta uu garsooraha ammri karo kaddib marka la qabto dhageysiga oo keliya. Fadlan si taxadir leh u akhri qeybtaan ka hor inta aadan codsanin in lagu siiyo garta. Waxaad calaameyn kartaa in ka badan hal sanduuq.*
- a. Check this box if you want the judge to give you temporary custody of joint minor children. If you check this box, you must also answer question 18. *Calaamee sanduuqaan haddii aad rabtid in garsooraha ku siiyo haynta ku meel gaarka ah caruurta yaryar ee idinka dhexeyso. Haddii aad calaameysid sanduuqaan, sidoo kale waa in aad ka jawaabtid su'aasha 18.*

- b. Check this box if you want the judge to order the respondent to temporarily pay you a reasonable amount of money to support your joint minor children. If you check this box, you must also answer question 19. *Calaamee sanduuqaan haddii aad dooneysid in garsooraha ammro eedeysanaha in uu si ku meel gaar ah u bixiyo lacag macquul ah si loo masaruufo caruurta yaryar ee idinka dhexeyso. Haddii aad calaameysid sanduuqaan, waa in sidoo kale aad ka jawaabtid su'aasha 19.*
- c. Check this box if you want the judge to order the respondent to temporarily pay you a reasonable amount of money to help you pay living expenses, like rent or food. If you check this box, you must also answer question 19. *Calaamee sanduuqaan haddii aad dooneysid in garsooraha ammro eedeysanaha in uu si ku meel gaar ah u bixiyo lacag macquul ah si aad isaga bixisid kharashka nolosha, sida kirada ama raashinka. Haddii aad calaameysid sanduuqaan, waa in sidoo kale aad ka jawaabtid su'aasha 19.*
- d. Check this box if you want the judge to award you the temporary use and possession of personal property. If you check this box, you must describe the property. Please list what the property is and where the property is located. *Calaamee sanduuqaan haddii aad dooneysid in garsooraha ku siiyo istimaalka ku meel gaarka ah iyo milkiyadda hantida shakhsiga. Haddii aad calaameysid sanduuqaan, waa in aad sharaxdid hantida. Fadlan qor waxa hantida tahay iyo meesha hantida taal.*
- e. Check this box if you want the judge to order the respondent not to dispose of or destroy personal property. If you check this box, you must describe the property. Please list what the property is and where the property is located. *Calaamee sanduuqaan haddii aad dooneysid in garsooraha ammro eedeysanaha in uusan tuurin ama burburinin hantida shakhsiga. Haddii aad calaameysid sanduuqaan, waa in aad sharaxdid hantida. Fadlan qor waxa hantida tahay iyo meesha hantida taal.*
- f. Check this box if you want the judge to order the respondent to pay you for expenses resulting from the abuse. Expenses may include medical bills or the cost to replace or repair destroyed or damaged property. If you check this box, you must also answer question 20. *Calaamee sanduuqaan haddii aad dooneysid in garsooraha ammro eedeysanaha in uu ku siiyo kharashka ka dhashay ku xad gudubka. Kharashka waxaa ka mid noqon kara biilasha caafimaadka ama kharashka lagu baddalo ama lagu hagaajiyo hantida la burburiyay ama la khasariyay. Haddii aad calaameysid sanduuqaan, waa in sidoo kale aad ka jawaabtid su'aasha 20.*
- g. Check this box if you want the judge to order the respondent to attend counseling, alcohol or drug treatment, or obtain a mental health evaluation. *Calaamee sanduuqaan haddii aad dooneysid in garsooraha ammro eedeysanaha in uu tago la-tallin, daweynta qamrada ama mukhaadaraadka ama in la siiyo qiimeynta caafimaadka madaxa.*
- h. Check this box if you want the judge to order the respondent not to possess firearms or ammunition. Under federal law, it is a crime for the respondent to possess or transport firearms or ammunition while there is a “qualifying protective order” in place. In order for an OFP to be a “qualifying protective order,” a hearing must be held and other requirements must also be met. If you have concerns about this question, or how your safety may be affected by the respondent’s access to firearms or ammunition, please speak with an advocate or an attorney. To be connected with an advocate, you may call the Day One® MN Domestic Violence Crisis Line at 1.866.223.1111. *Calaamee sanduuqaan haddii aad dooneysid in garsooraha ammro eedeysanaha in uusan yeelanin hub ama rasaas. Sida hoos timaado sharciga federaalka, waa dambi in eedeysanaha haysto ama qaato hub ama rasaas inta uu jiro "ammarka badbaadinta." Si OFP\_ga u noqdo "ammarka badbaadinta habboon," waa in la qabto dhageysi oo lala kulmo sharuudo kale. Haddii aad ka walwalsan tahay su'aashaan, ama sida ay u saamayn karto ammaankaada marka eedeysanaha qaato hub ama rasaas, fadlan la hadal u-doode ama qareen. Si laguula xariiriyo u-doodaha, waxaad wici kartaa Day One® Shiddada Dagaalka Guriga MN (Day One® MN Domestic Violence Crisis), telefoonka 1.866.223.1111.*

- i. Check this box if you want the judge to grant the OFP for a period of up to 50 years. Check the box that states why you qualify for an OFP for a period of up to 50 years. You may qualify if: *Calaamee sanduuqaan haddii aad dooneysid in garsooraha soo saaro OFP muddo gaareysa ilaa 50 sanno. Calaamee sanduuqa sheega sababta aad xaq ugu yeelatay OFP gaarsiisan ilaa 50 sanno. Waxaad u yeelan kartaa xaq haddii:*

1. The same respondent violated a prior OFP protecting you two or more times (a violation does not have to result in a conviction); or  
*Isla eedeysanaha uu labo jeer ama ka badan jebiyay OFP hore oo adiga ku badbaadiya labo jeer ama ka badan (ma aha qasab in jebinta dhalliso xukun); ama*
2. You have had two or more OFPs against the same respondent.  
*Aad isla eedeysanaha ka qaadatay labo OFP ama ka badan.*

### 18. Temporary Custody and Parenting Time

#### *Haynta Ku Meel Gaarka ah iyo Waqtiga Waalidnimada*

- a. If you want the judge to give you temporary custody of joint minor children, write the names of the children here and the reason why you should be awarded temporary custody.  
*Haddii aad dooneysid in garsooraha ku siiyo haynta ku meel gaarka ah caruurta yaryar ee idinka dhaxeysa, halkaan ku qor magacyada caruurta iyo sababta loo baahan yahay in adiga lagu siiyo haynta ku meel gaarka ah.*
- b. Write what parenting time, if any, you think the respondent should have with the joint minor children. Check the box next to the choice you want and explain your choice(s) on the lines provided. If you want the respondent's parenting time to be restricted or supervised, please write the reasons why. If you have other requests that have to do with temporary custody and parenting time, please check the box marked "other" and explain.  
*Qor waqtiga waalidnimada, haddii ay jirto, oo aad u maleysid in loo baahan yahay in eedeysanaha la siiyo, lana joogo caruurta yaryar. Calaamee sanduuqa ku xiga xulashada aad dooneysid iyo waxaad xulashadaada (xulashooyinkaada) ku sharaxdaa xariiqmanka lagu siiyay korkooda. Haddii aad dooneysid in la soo koobo waqtiga waalidnimada eedeysanaha ama in la kormeero, fadlan qor asbaabta aad u rabtid sidaas. Haddii aad qabtid codsiyo kale oo lug ku leh haynta ku meelgaarka ah iyo waqtiga waalidnimada, fadlan calaamee sanduuqa ku calaameysan "Wax kale" kaddibna sharax.*

### 19. Temporary Financial Support

#### *Taakuleynta Maaliyadda Ku Meel Gaarka ah*

- a. Please check the type of temporary financial support you are requesting from the respondent, if any. You may choose child support, spousal maintenance, and/or medical support or health insurance. In order to help the judge decide how much financial support you need, please answer the questions about your income and expenses. Answer the questions here about the respondent's income and expenses here, if known.  
*Fadlan calaamee nooca taakuleynta maaliyadda ku meel gaarka ah aad adiga ka codsanaysid eedeysanaha, haddii ay jirto. Waxaad dooran kartaa masaruufka ilmaha, taakuleynta xaaska, iyo/ama gargaarka caafimaadka ama ceymiska caafimaadka. Si loo kaalmeeyo garsooraha in uu go'aan ka gaaro qiyaasta taakuleynta maaliyadda aad u baahan tahay, fadlan ka jawaab su'aalaha ku saabsan dakhligaada iyo kharashka. Halkaan uga jawaab su'aalaha ku saabsan dakhliga iyo kharashka eedeysanaha, haddii aad ogsoon tahay.*
- b. Write in the amount you have to pay for child care, if any.  
*Qor lacagta loo baahan yahay in aad ka bixisid xanaanada cunugga, haddii ay jirto.*

- c. Check the box that shows what type of health insurance you or your children have, if any.  
*Calaamee sanduuqa muujiya nooca ceymiska caafimaadka aad adiga iyo caruurtaada haysataan, haddii uu jiro.*
- d. Write in any other information about why you want or need temporary financial support from the respondent.  
*Qor macluumaad kasta oo kale oo ku saabsan sababta aad eedeysanaha uga rabtid taakuleynta maaliyadda.*

## 20. Restitution

### *Magta*

You may ask the judge to order the respondent to pay you for expenses resulting from respondent's abuse. These may include medical bills or the cost to replace or repair damaged property or the expense to change locks. Please describe the expenses here and write the total dollar amount.

*Waxaad garsooraha ka codsan kartaa in uu eedeysanaha ku amro in uu ku siiyo kharashka ka dhashay xadgudubka eedeysanaha. Waxaa ka mid ah biilasha caafimaadka ama kharashka lagu baddalo ama lagu hagaajiyo hantida burburtay ama kharashka ku baxa baddalaadda qufulada. Fadlan halkaan ku sharax kharashka kuna qor iskudarka xisaabta doolarka.*

PLEASE NOTE: PROOF OF YOUR FINANCIAL LOSS MUST BE PROVIDED TO THE JUDGE at the time of the hearing. Proof of your financial loss may include receipts.

*FADLAN XASUUSO: CADDEYNTA KHASAARADA MAALIYADDA KU SOO GAARTAY WAA IN LA SIIYO GARSOORAHA waqtiga dhageysiga. Caddeynta khasaarada maaliyadda ku soo gaartay waa in la soo raaciyo resiidyada.*

21. This section explains that if you, the judge or the respondent requests a hearing and the hearing is held, that you may ask the judge for any other relief at the hearing, even if you did not request that relief in this petition.  
*Qeybtaan waxay sharaxdaa in haddii adiga, garsooraha ama eedeysanaha codsataan dhageysi kaddibna dhageysiga la qabto, in adiga aad garsooraha ka codsan kartid in lagu siiyo gar kale inta uu socdo dhageysiga, xattaa haddii aadan gartaas ku codsanin codsigaan.*

**How to File the Order for Protection Petition**  
**Sida loo Gudbiyo Codsiga Ammarka Badbaadinta**

1. Read the “Notice to Petitioner Regarding Information Provided in Petition and Affidavit” (Form OFP103).  
*Akhri "Ogeysiiska la Siiyo Codsadaha Kuna Saabsan Macluumaadka ku jira Codsiga iyo Warqadda Lagu Dhaarto" (Foomka OFP103).*
2. Complete the “Law Enforcement Information Sheet” (Form OFP105). This form will help the police find the respondent to personally serve the OFP. The information you write on this form may help the police do this more safely.  
*Buuxi "Warqadda Macluumaadka Hirgelinta Sharciga" ("Law Enforcement Information Sheet") (Foomka OFP105). Foomkaan wuxuu boliiska ku kaalmeeyaa in ay helaan ee deysanaha in uu qof ahaan gaarsiiyo OFP. Macluumaadka aad ku qortid foomkaan wuxuu boliiska ku kaalmeyn karaa in ay tani u sameyaan si ammaan ah.*
3. Complete the "Confidential Address/Phone Request" (Form OFP107) if you are requesting that your address or phone number be kept confidential.  
*Buuxi "Codsiga Cinwaanka/Telefoonka Qarsoodiga" (Foomka OFP107) haddii aad codsanaysid in cinwaankaada ama nambarka telefoonkaada laga dhigo qarsoodi.*
4. Take the completed forms to the Court Administrator’s Office.  
*Waxaad foomamka la dhamaystiray geyn kartaa Xafiiska Maamulaha Maxkamadda (Court Administrator's Office).*